

# Digniinta taleefan been ah oo la iskala soo hadlo



Khiyaamada u taxaluuqada taleefanada beenta ahi waxay sii badanayaan dad badana waxay ku waayaan lacag ka timid in lagu khiyaameeyo macluumaadka kaadhka iyo lambarka sirta ah ama duwaankooda bangiga ah ee online ah.

Bilaysku waxa ay soo saareen tilmaamaha soo socda si aad iskaga ilaaliso inay ku saamayso. Macluumaadkan gaadhsii cid kasta oo aad taqaano.



- ◆ **Weligaa ha bixinin** macluumaadka kaadhkaaga, lambarka sirt ah ama macluumaadka kale ee xasaasiga ah. Weligaa. Macluumaadka kaadhka iyo lambarka sirtu waa furaha lacagtaada.
- ◆ **Weligaa ha isticmaalin** akhriyaha kaadhkaaga bangiga ama Aqoonsiga bangiga marka uu qofku ku waydiiyo kula soo xidhiidhayi. Qof sax ahi kuma waydiinayo inaad waxyaabaha taleefanka ku isticmaasho.
- ◆ **Hadii qof aanad garanaynini uu kula soo hadlo** oo aad ka shakido, dhig taleefanka ama u sheeg inuu kaagu soo celiyo lambar aad hore u taqaanay. Tani samee mar kasta hadii qofku sheegto inuu yahay qaraabada dhaw ama shaqaale bangi, shirkada ama hay'ad dawladeed.
- ◆ **Ha aaminin dadka kuugu** jira taleefankaaga maadaama oo ay kaa hayaan macluumaad adiga. Dadka khiyaamada wadaa waxay ka heli karaan macluumaadkan onlineka si ay kuugu khiyaameeyaan.
- ◆ **Hadii ay ku saameeyeen ama aad ka shakiday in lagu khiyaameeyay**, la xidhiidh bangigaaga sida ugu dhakhsaha badan. Mar kasta u sheeg fal danbiga bilayska oo ka dalbo kaalmo dadka kugu dhaw.